

# Isticmaal Barnaamijkam

“Dhalinyarada Waxqabanaysa”!



# SOMALI

Waxaanu rajaynaynaa in macluumaadka buugyarahani kaa caawin doono inaad ogaato fursadaha uu soo bandhigayo Barnaamijka “Dhalinyarada Waxqabanaysa” ee Golaha Yurub, inuu nidaamka dalbashada ka dhigo mid si sahlan loo fahmi karo isla markaana uu kugu dhiiriyo inaad adiga laftaadu mashaariic la samayso dhalinyarada.

## ACKNOWLEDGEMENTS

This booklet was translated by:  
Sulaiman Egeh

We would like to thank him and all the others that contributed to this project.

**Produced by:** SALTO Cultural Diversity Resource Centre;  
Susie Green, Antonio Gomes, Martin Schippan

**Designer** Sónia Garcia

Miyaad doonaysaa inaad ka qaybqaadatid fursado cusub iyo inaad mashaariic ka qabatid dalal dibeda ah? Miyaad doonaysaa inaad iskaashi la samaysid lam-maaneyaasha ka socda dhaqamada kale kuna dhiirisid dhalinyarada inay si firfircoon uga qayb qaataan si ay u abuuraan mashaariic saameeya beesha maxaliga ah? Miyaad doonaysaa inaad dalka dibediisa ku noolaatid oo aad saaxiibo cusub samaysatid?

Isticmaal Barnaamijka “Dhalinyarada Waxqabanaysa”!	
Waa maxay ‘muwaadinnimada Yurubiyanku’?.....	02
Waa maxay macnaha ‘Ka Qaybqaadashada Dhalinyaradu’?.....	02
Waa maxay ‘Kala Duwanaanshaha Dhaqanku’?.....	02
Waa maxay macnaha ‘Ku daritaanka dadka haysta fursadaha yari’?.....	02
ISWEYDAARSIGA DHALINYARADA.....	04
MASHAARIICDA DHALINYARADA.....	05
MASHAARIICDA DIMUQURAADIYADDA EE DHALINYARADA.....	06
ADEEGGA MUTADAWUCNIMADA EE YURUBIYANKA.....	07
DHALINYARADA DUNIDA.....	08
MASHAARIICDA TABABARKA IYO WADASHAQAYNTA.....	08
TAAGEERIDA ISKAASHIGA YURUBIYANKA EE AAGGA DHALINYARADA....	09
FOOMKA DALBASHADA.....	10
MAARAYNTA MASHRUUCA .....	13
SHAHAADADA ‘YOUTH PASS’.....	16
EREY BIXIN.....	16



## Barnaamijka

**“Dhalinyarada Waxqabanaysa”** waxa loogu talagalay dhammaan dhalinyarada wax qabanaysa ee wax abuuraya ama shaqaalaha dhalinyarada oo looga danleeyahay inuu siiyo qaabka aasaasiga ah si ay fikradahooda u gaadhaan iyo awooddooda. Qaabkan aasaasiga ahi wuxuu ku dhisanyahay afar tiir (fikradood) oo hoos lagu sharxay:



### Waa maxay ‘muwaadinnimada Yurubiyanku’?

Fikradda muwaadinnimada Yurubiyanku waxay ka taageertaa dadka ku nool Yurub inay beelahooda daryeelaan iyo inay ogaadaan qiimaha dimoqoraadiyadda iyo xorriyadda. Waxa looga danleeyahay inay dhalinyaro badan siiso fursad ay dhaqankooda kula wadaagaan dhalinyarada kale ee ka yimi dhaqano kale oo ka duwan, dalal, diimo, waxbarasho ka duwan ama hab nololeed kale ama hab fakir kale oo ka duwan. Ka feker waxaad ka qaban kartid si aad uga dhigto hadda iyo mustaqbalka Yurub goob isfaham iyo is ogolaansho!

### Waa maxay macnaha ‘Ka Qaybqaadashada Dhalinyaradu’?

Dhalinyarada maantu waa taliyeyaashii berri sidaas darteed Barnaamijka “Dhalinyarada Waxqabanaysa” wuxuu doonayaa inuu ku dhiirriyo iyaga inay qayb firfircoon ka noqdaan bulshada iyo inuu siiyo fursado ay ku qaabeeyaan beeshooda iyo Yurub. Mashaariicda laga hoos sameeyo Barnaamijka “Dhalinyarada Waxqabanaysa” waxay dhalinyarada u ogolaanayaan inay mashaariicdooda maamulaan go’aanadoodana gaadhaan.

### Waa maxay ‘Kala Duwanaanshaha Dhaqanku’?

Ixtiraamka asalka dhaqanka dadka kale waa wadnaha Barnaamijka “Dhalinyarada Waxqabanaysa”, sida uu u yahay la dagaalanka cunsuriyadda iyo ajnabi nacaybku. Barnaamijku wuxuu taageerayaa mashaariicda iyo waxqabadyada ay dhalinyarada ka socota dhaqanada kala duwan, diimaha, iyo qowmiyadaha kala duwani ka wada shaqayn karaan ujeedooyin guud sida u adkaysiga kala duwanaanshaha, isku duubnaanta, ixtiraamka iyo isfahamka dhaqamada.

### Waa maxay macnaha ‘Ku daritaanka dadka haysta fursadaha yari’?

Barnaamijka “Dhalinyarada Waxqabanaysa” waxa loogu talagalay dhalinyarada ka socota DHAMMAAN waxbarashada, dhaqan dhaqaale, dhaqan ama juquraafiyadda kala duwan, iyo weliba dhalinyarada faqiirka ah. Taasina waa sababka ururada iyo kooxaha dhalinyarada ee maalgelinta u dalbada mashaariicdooda ay u heli karaan taageero maaliyadeed oo dheeraad ah si ay uga daboolaan kharashka gaarka ah si hubaal i ooga dhigo iyo dhammaan kooxaha la abbaarayaa - oo ay ku jiraan dhalinyarada leh baahiyaha gaarka ahi – ay uga qayb qaadan karaan waxqabadyada la qorsheeyey.



Maalgelinta mashaariicda Barnaamijka

**“Dhalinyarada Waxqabanaysa”** waxa loo heli karaa laga bilaabo sannadka 2007 illaa iyo dhammaadka 2013 mashaariicda soo socota:

**Isweydaarsiga Dhalinyarada** fursad ay koox dhalinyaro ahi kula kulanto kooxo kale oo ka socda dalal kale oo uu midba ka kale dhaqankiisa ku barto iyagoo si wadajir ah uga wada shaqaynaya mawduuc gaar ah

**Mashaariicda Dhalinyarada** ka taageeraya kooxaha dhalinyarada inay hirgeliyaan fikradahooda isla markaana ay sameeyaan mashaariic dhab ah oo heer maxali ah, goboleed, qaran ah. Waxa kale oo suurtoagal ah in lala dhiso shebekedo lammaaneyaasha kale ee ka socda dalalka kale iyo in la wada abuurto mashruuc caalami ah.

**Mashaariicda Dimuquraadiyada ee Dhalinyarada** odhiirinaya ka qaybqaadashada dhalinyarada ee nidaamka dimuquraadiyadda, ee heer maxali, goboleed, qaran iyo caalamiba ah.

**Adeegga Mutadawucnimada ee Yurubiyanka** siinta dhalinyarada fursad ah inay dibeda ku noolaadaan, wax badan ka ogaadaan dalka & dhaqanka iyo inay taageeraan mashaariicda maxaliga ah.

**Dhalinyarada Dunida** waxa uu la mid yahay Isweydaarsiga Dhalinyarada ama mashaariicda ay taageeraan Nidaamada Taageerada Dhalinyarada laakiin waxa weheliya lammaaneyaalka ka socda Dalalka Lammaanaha ee Jaarka ee midowga Yurub.

**Nidaamada Taageerada Dhalinyarada** waxa uu taageeraya horumarinta mashaariicda tayada isagoo isku xidhaya shaqaalaha dhalinyarada iyo ururada, iyagoo wadaagaya fikradaha iyo waxqabadka, baranaya oo ku horumarinaya siminaaro iyo tababaro

**Taageerada iskaashiga Yurub ee aagga dhalinyarada** taageeraya iskaashiga iyo wada xaajoodka ka dhexeeya dhalinyarada iyo dadka kale ee masuulka ka ah siyaasadda dhalinyarada



## ISWEYDAARSIGA DHALINYARADA

Isweydaarsiga Dhalinyaradu waa mashruuc isu keena kooxo dhalinyaro ah oo ay da'doodu u dhaxayso 13 iyo 25, iyadoo siinaysa fursad ay kaga wada hadlaan mawduucyo gaar ah, iyagoo baranaya midba ka kale dhaqankiisa iyo dalkiisa. Tirada dalalka shuraakada ka ah ee kooxaha kala duwani ay ka yimaadeen, Isweydaarsiga Dhalinyaradu wuxuu noqon karaa laba dal, 3 dal ama 4 dal ama in ka badan.

Dhammaan kooxaha ka qayb qaadanayaa Isweydaarsigooda Dhalinyarada way wada qorsheeyaan. Mashruuc kasta, oo uu ka mid yahay heerka u diyaargarowga iyo qiimayntu waxay qaadan karaan illaa iyo 15 bilood. Isweydaarsigu (marka dhammaan kooxaha ka qaybqaadanayaa ay isu yimaadaan) wuxuu qaadan karaa inta u dhaxaysa 6-12 maalmood (oo aanay ku jirin maalmaha socdaalku) waana inuu ka dhacaa dalka mid ka mid ah kuwa hirgelinaya.

### Inta ay ka koobanyihiin koox kasta oo ka qaybqaadanaysa Isweydaarsiga Dhalinyarada:

- \_Isweydaarsiga Dhalinyarada ee Labada Dal: ugu yaraan 8 qof kooxdiiba
- \_Isweydaarsiga Dhalinyarada ee Saddexda Dal: ugu yaraan 6 qof kooxdiiba
- \_Isweydaarsiga Dhalinyarada ee Dalalka Badan: ugu yaraan 4 qof kooxdiiba
- \_Tirada ugu badan ee dadka ka qayb qaadanaya mashruuca oo dhan: 60
- \_koox kasta oo dal ka socotaaba waa inay lahaataa hal ama laba hogaamiye kooxeed

### Taageerada maaliyadda:

Barnaamijka "Dhalinyarada Waxqabanaysa" wuxuu ka taageeraa diyaarinta kooxda, Booqashada Sii Qorshaynta, kharashyada socdaalka (70%), hoygq, cuntada, kharashyada gaarka ah, kharashyada dabagalka ku baxa.

#### Tusaale:

Isweydaarsiga Dhalinyarada ee Labada Dal ah ee la yidhaahdo "Waqtiga Firaqada iyo mutadawucitaanka magaalooyinka" ee talyaaniga gudihisa ee ay 20 dhalinyaro ah oo ka socda Talyaaniga iyo Portugal. Isweydaarsiga waxa looga dan lahaa inuu dhalinyarada 16 illaa 18 jirka ah siiyo qaab dhismeedka aasaasiga ah ee mutadawucnimada. Barnaamijku wuxuu isugu jirey nashaadyo baraktiko ah oo ay dhalinyaradu u shaqeeyeen kooxo iyagoo tijaabinaya waxqabadyo mutadawucnimo ah oo kala duwan. Mashruucu waxa kale oo uu u ogolaaday ka qaybqaateyaasha koox kasta oo daleed inay soo bandhigaan taariikhda iyo dhaqanka dalkooda.



## MASHAARIICDA DHALINYARADA

Mashaariicda Dhalinyaradu waa qalab weyn oo loogu talagalay dhalinyarada jirta 18-30 sanno si ay fikradahooda ugu bedelaan waxqabad iyagoo bilaabaya, aasaasaya isla markaana samaynaya mashaariic ay iyagu iska leeyihiin. Dhalinyaradu waxa kale oo ay masuul ka yihiin qorshaynta, hirgelinta iyo qiimaynta. Haseyeeshee waxa suurto ah inuu ku lug yeesho tababare, ka taageeri kara iyaga aasaasitaanka mashruuc tayo leh. Mashaariicdani waa inay ku dhammaadaan inta u dhaxaysa 3 illaa iyo 18 bilood waxaana lagu samayn karaa heer maxali, goboleed ama qaran. Mashaariicda Dhalinyarada waxa qabanqaabin kara hal urur ama koox dhalinyaro ah laakiinse waxa kale oo qabanqaabin kara laba ama in ka badan oo ka socda Dalalka Mashruuca oo kala duwan.

Waxa kale oo uu ku saabsanyahay siinta dhalinyarada fursad ay ku tijaabiyaan fikradahooda, isagoo ka dhigaya qaar ka warqaba muwaadinnimadooda Yurubiyanka ah iyo siyaabaha ay gacanta uga geysan karaan dhisitaanka Yurub.


Muhimada mashruuca ee Mashaariicda Dhalinyarada waxa lala xidhiidhin karaa farshaxanka & dhaqanka, deegaanta, ilaalinta dhaxalka, macluumaadka dhalinyarada, horumarinta miyiga/magaalada, siyaasadaha dhalinyarada, caafimaadka, kahortagga cunsuriyadda, taageeridda naafada, waxbarashada carruurta, ciyaaraha dhalinyarada, madadaalada dhalinyarada, isgaadhsiinta & warbaahinta, iwm.


### Taageerada maaliyadda:

Barnaamijka “Dhalinyarada Waxqabanaysa” wuxuu daboolayaa dhammaan kharashyada sida tooska ah ula xidhiidha hirgelinta mashruuca (illaa iyo heer go’an) sida alaabada, xidhiidhka ama isgaadhsiinta iyo kharashyada gaarka ah iyo weliba taageero ah ka qaybqaadashada tababare. Mashruuca Dhalinyarada ee Caalamiga ah, Booqashada Sii Qorshaynta iyo 70% kharashka socdaalka () ayaa la maalgeliyaa.

Tusaale:

12 dhalinyaro ah oo ka socda dalka Turkey ayaa waxay sameeyeen mashruuc looga danleeyahay inuu xirfadaha aasaasiga ah ee kombuyuutarka siiyo carruurta waddooyinka ka shaqaysta. Kooxdu waxay iskaashi la sameeyeen kilaab dhalinyaro oo maxali ah oo si joogto ah ula shaqeeya carruurta. Kadib markay la hadleen carruurta, kooxdu waxay ogaadeen xaaladooda waxayna weydiiyeen waxay jecelyihiin ee ay doonayaan inay qabtaan; halkaas ayay ka dhalatay fikradda tababarka kombuyuutarku. Tababarkii wuxuu ku dhammaaday saddex bilood mashruuciina wuxuu gaadhay in ka badan 70 carruur ah.





## MASHAARIICDA DIMUQURAADIYADDA EE DHALINYARADA

Mashaariicda Dimuquraadiyadda ee Dhalinyaradu waxay taageertaa ka qaybqaadashada dhalinyarada ee nolosha dimuquraadiga ah ee beeshooda maxaliga, goboleed, ama qaran, iyo heer caalamiba. Mashaariicdani waxay u ogolaadaan 13 illaa iyo 30 jirka sharci ahaan deggan dalka barnaamijka inay abuuraaan shebekedo cusub, isweydaarsadaan oo faafiyaan waxqabadka wanaagsan ee aagga ka qaybqaadashada dhalinyarada iyo muwaadinnimada.

Mashruuca Dimuquraadiyadda ee Dhalinyarada ugu yaraan 16 qof oo ka socda ugu yaraan 2 dak oo kala duwan ayaa loo baahanyahay. Waa inay ugu yaraan laba kooxood oo firfircooni ka jiraan dal kasta, mashruucuna wuxuu ku dhammaan karaa inta u dhaxaysa 6 illaa iyo 18 bilood oo ay ku jirto heerka u diyaargarowga iyo qiimayntu.

Tusaale:

40 dhalinyaro ah oo ka socda 11 ah dalalka barnaamijka ayaa kulmay 10 maalmood si ay u kiciyaan shaqada iyo nidaamka go'aan qaadashada ee Baarlamaanka Yurub. Kuwa ka qaybqaadanayaa waxay magacaabeen madaxweynaha baarlamankooda waxa kale oo ay sameeyeen kooxaha baarlamaanka iyo guddiyada si ay u falanqeeyaan arrimaha la magacaabay ee ugu sarreeya ajandaha Yurub ee khuseeya nolosha dhalinyarada ku nool Yurub. Heerka diyaargarowga kadib oo ku salaysan waraaqo iyo shaqooyinka dhabta ah ee Baarlamaanka Yurub ayaa waxay qabteen kulanka Baarlamaanka Yurub. Intii lagu jirey 10ka maalmood waxa kale oo ay la kulmeen wakiilada ka socda Baarlamaanka Yurub.





## ADEEGGA MUTADAWUCNIMADA EE YURUBIYANKAS

Waxa uu u soo bandhigaa dhalinyarada da'doodu tahay 18-30 fursad ay deegaan tooda ka duwan kaga qabtaan muddo adeeg mutadawucnimo ah dal kale illaa iyo hal sanno. Adeegga Mutadawucnimada ee Yurubiyanku uma baahna shahaado lagu galo waxaanuu u furanyahay dhammaan dhalinyarada. Hoyga waa la siiyaa mutadawuciintuna waxa la siiyaa "lacag yar" oo lagaga bixinayo kharashka ka baxay. 'Adeegga Mutadawucnimada ee Yurubiyanka' waa xidhiidh ka dhexeeya saddex meelood: mutadawuca, Ururka Diraya (ee masuulka ka ah diyaarinta iyo diritaanka mutadawuca) iyo Ururka Martigelinaya (ee masuulka ka ah geynta mutadawuca, barnaamijka waxqabadka iyo badbaadada).

Mashaariicda jira waxa ka mid ah ka shaqaynta xarumaha dhalinyarada, la shaqaynta dadka da'da ah, taageeridda barnaamijyada dib u warshadaynta ama deegaanta iyo mashaariicda dhaxalgalka dhaqanka. Laakiin faragelinta khatarteedu sarrayso ee xaaladaha dhibaatooyinka kadib (sida gargaarka aadaminimada ah, gargaarka degdegga ah ee burburka iwm) LAGUMA darin barnaamijkan.

Si ay u qabtaan shaqooyinka mutadawucu waxa laga yaabaa inuu ka helo tababar gaar ah dhinaca sida u qabanqaabinta waxqabadyo dhalinyarada, waxbarashada dhaqamada ka dhaxaysa, dhisitaanka koox, maaraynta waqtiga iyo khilaafyada, iyo fekeritaanka abuurista leh.

Adeegga Mutadawucnimada ee Yurubiyanku wuxuu dhalinyarada siiyaa fursad ay faraqu ugu sameeyaan beesha maxaliga ah ee dalka dibediisa isla markaana ay ku yeeshaan xirfado ay hadhow ku dabiqi karaan beesha 'gurigooda'. Sidoo kale xirfadaha cusub ee ay soo bardeen dhalinyaradu waxay kobcin karaan saamayna ku yeelan karaan shaqada mustaqbalka.

Dhalinyarada haysata fursado intaas ka yari waxay samayn karaan 'Adeegga Mutadawucnimada Yurubiyanka ee Muddada Gaaban ah' (ee qaadana 2 toddobaad) ee wata fursadda ay ugu siyaadinayaan ugu badnaan 12 bilood haddii ay doonayaan oo ay diyaar u yihiin karina karaan inay shaqada maarreeyaan.

### Tusaale:

Wiil 24 jir ah oo ka yimi England, oo jeel galay guri la'aanina ay haysay ayaa wuxuu bilaabay inuu si mutadawucnimo ah uga shaqeeyo urur samafal oo maxali ah sababtoo ah waxa ku adkaatay inuu shaqo helo. Waxa uu halkaas ku maqlay inay suurtoagal tahay inuu ka qaybgalo 'Adeegga Mutadawucnimada Yurubiyanka ee Muddada Gaaban ah'. Inkasta oo aanu hore uga bixin England, ayaa hadana wuxuu tegey mashruuc ah gudaha dalka Poland kaas oo siiyey fursad ah inuu ka qaybqaato inuu caawimo ka geysto dib u qurxinta xadiiqad beeleed. Markuu soo noqday kadib wuxuu khibraddiisa ku sheegay "waqtigii noloshiisa" wuxuuna go'aansaday inuu mashruuca dib ugu laabto afar bilood oo kale. Waxa kale oo uu kaga qaybgalay dabbaaldegi Golaha Yurubiyanka ee sanadguuradii 10aad ee qorshaha "Adeegga Mutadawucnimada ee Yurubiyanka" sidii wafdi ofishal ah.

## DHALINYARADA DUNIDA

Barnaamijka noocan ahi wuxuu taageeraa waxqabadyada la xidhiidha kooxaha aan caadiga ahayn ee dhalinyarada iyo ururada ka socda Dalalka Lammaanaha iyo Dalalka Lammaanaha ee Jaarka. Sida Isweydaarsiga Dhalinyarada ayaa wuxuu dhiirigeliyaa wada-hadal, is afgarasho, ogaanshaha dhaqamada kale iyo isku duubnaan, si loo jebiyo waxyaabaha qaladka ah ee la iska aaminsanyahay, iyo in bulshada lagu dhiso xirtaam iyo dimuquraadiyad dhammaan dalalka dunida oo dhan.

Tallaabadani waxay caawisaa in mashruucyada iskaashiga laga abuurdo aagagga dhalinyarada, gaar ahaan isweydaarsiga Dhalinyarada iyo fursadaha tababarka iyo shebekedo samaynta.

Tusaale:

Urur Joorjiyan ah (Georgian) iyo koox Ingiriis ah ayaa bilaabay mashruuca isweydaarsiga dhalinyarada ee dhaqanada badan ee la yidhaahdo “Yurub Waxay Ku Kulantay Dhulkii Medea” – Isweydaarsiga Dhalinyarada ee lagaga hortegayo waxyaabaha qaladka ah ee cid laga aaminsanyahay iyo ajnabi nacaybka si loo dhiiriyo Isfaham Dhaqamada Ka Dhexeeya” dalka Joorjiya. Mashruuca la doonayey wuxuu ka koobnaa lix kooxood oo dhalinyaro ah oo ka kala socda dalalka Yukrayn, Joorjiya, Raashiya, Ingiriiska, Istooniya iyo Jarmalka. Koox kastaa waxay ka koobnayd afar qof oo ka qaybqaadanaya iyo hal hogaamiye kooxeed

## MASHAARIICDA TABABARKA IYO WADASHAQAYNTAA

Dhammaan dadka ku lugta leh ama danaynaya waxbarashada aan caadiga ahayn iyo shaqada dhalinyarada (shaqaalaha dhalinyarada iyo hogaamiyeyaasha, la taliyeyaasha dhalinyarada, tababareyaasha, siyaasad sameeyeyaasha) ee sida sharciga ah u deggan Dalka Barnaamijka wayka qaybqaadan karaan nashaadyada Tababarka iyo Wadashaqaynta ee hoos lagu sharxay:

**Shaqo u tababarid (Job Shadowing)** la joogitaanka ururka kula shaqeeya muddo gaaban dal kale iyadoo ay ujeedadu tahay isweydaarsiga waxqabadka wanaagsan, ku barashada xirfadaha iyo aqoonta daawashada ka qaybqaadashada ah

**Booqashada eegitaanka** kulan gaaban oo lala yeesho kuwa kula shaqayn doona si loo ogaado suurtoagalnimada samaynta mashruuc dalal badan ah mustaqbalka. Ujeedadu waxa weeye si loo horumariyo loona wanaajiyo iskaashiga hadda jira iyo si loo diyaariyo mashruuca mustaqbalka.

**Kulanka Qiimaynta** kulan lala qorsheeyey kuwa kula shaqayn doona si loo qiimeeyo kulanaadii hore, siminaarada, koorsooyinka tababarka

**Booqashada Deraasadda** barnaamij deraasadeed oo la qabanqaabiyey oo diiradda saaraya mawduuc gaar ah isla markaana ku wargelinaya shaqada dhalinyarada iyo taageerada siyaasadda dhalinyarada ee hal dal

**Waxqabadka Dhisitaanka-Shuraako** dhacdo la qabanqaabiyey si loogu ogolaado dadka ka qaybqaadanaya inay u helaan lammaaneyaalka ama cid la shaqaysa iskaashiga dalalka badan iyo horumarinta mashruuca

**Siminaar** dhacdo mawduuceed la qabanqaabiyey si loo siiyo mawqifka doodaha iyo isweydaarsiga waxqabadka wanaagsan ee mawduuc la doortay oo khuseeya aagga shaqada dhalinyarada

**Koorsada Tababarka** barnaamij waxbarasho oo lagu horumarinayo awoodaha, aqoonta, xirfadaha iyo dabeecadaha dadka ka qaybqaadanaya. Koorsooyinka tababarku waxa inay keenaan tayo sare oo ah shaqada dhalinyarada, gaar ahaan mashaariicda lagu sameeyey siduu dhigayo Barnaamijka “Dhalinyarada Waxqabanaysa”.

**Wadashaqaynta (Networking)** abuuritaanka, xoojinta iyo ballaadhinta xidhiidhaha ururada dhalinyarada.



## TAAGEERIDA ISKAASHIGA YURUBIYANKA EE AAGGA DHALINYARADA

Qaybtan ka midka ah Barnaamijka “Dhalinyarada Waxqabanaysa” waxay taageertaa iskaashiga, siminaarada iyo wadahadalka qaabaysan, ee ku salaysan mabaadii’da waxbarashada aan caadiga ahayn, ee ka dhaxaysa dhalinyarada, gaar ahaan kuwa sida firfircoon ugu jira shaqada dhalinyarada iyo kuwa masuulka ka ah siyaasadda dhalinyarada. Waxay qaybtani doonaysaa in:

- ay dhiiriso iskaashiga ka dhexeeya maamulada, siyaasad sameeyeyaasha iyo dhalinyarada
- horumariso aqoonta iyo fahamka dhalinyarada
- gacan ka geysato iskaashiga ururada caalamiga ah ee ku lugta leh aagga dhalinyarada

**mashaariicdu waa inay hirgeliyaan mid ama dhowr ka mid ah waxqabadyada soo socda:**

### **Kulanka Dhalinyarada ee Qaranka**

\_ Kulano meel loogu samaynayo doodaha iyo macluumaadka ku saabsan arrimaha khuseeya wadahadalka qaabaysan ama mawduucyada iyo siyaasadaha Midowga Yurub

\_ U diyaargarowga dhacdo dhalinyaro oo ofishal ah oo ay tahay inay qabanqaabiyaan Dal Xubin ka ah ee haya Madaxweynerimada Midowga Yurub

\_ Qabanqaabinta nashaadyo xidhiidh la leh “Toddobaadka Dhalinyarada ee Yurub”

\_ Kobicinta wadahadalka qaybo badan iyo iskaashiga ka dhexeeya aagagga waxbarashada ee caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn

### **Siminaarka Dhalinyarada ee Dalalka Badan**

\_ Isu imaatinka dhalinyarada iyo siyaasad sameeyeyaasha oo looga danleeyahay falanqaynta, isweydaarsiga afkaarta iyo waxqabadka ugu wanaagsan, iyo qaadashada waxyaabaha la soo jeediyo ee mawduucyada ku waajahan mudnaanaha iyo ahdaafta ‘Wadahadalka Qaabaysan’, ‘Xidhiidhinta Habka Furan’ ee aagga dhalinyarada iyo ‘Heshiiska Dhalinyarada ee Yurubiyanka’. Mashruuca noocan ah waxaad u baahan-tahay inaad soo hesho 30 ama ka badan oo qof oo ka qaybqaata oo ka kala socda ugu yaraan dal oo kala duwan oo ah Dalalka Barnaamijka.

## FOOMKA DALBASHADA

Si aad u dalbato maalgelin siduu dhigayo Barnaamijka “Dhalinyarada Waxqabanaysa”. Waxaad u baahantahay inaad buuxiso foomka dalbashada siduu dhigayo nooca mashruuca aad qorshaynayso.

Waxaad kasoo guurin kartaa: [www.ec.europa.eu/youth/youth-in-action-programme/doc411\\_en.htm](http://www.ec.europa.eu/youth/youth-in-action-programme/doc411_en.htm)

Markaad maalgelin dalbanayso ha illaawin:

\_Inaad dalabkaaga kusoo gudbisno foomka saxa ah, oo la wada buuxiyey taariikhdana lagu qoray

\_Inaad kusoo darto dhammaan waraaqaha dheeraadka ah ee dalabka lagu codsaday (sida qorshaha miisaaniyadda aad u malaynayso inay daruuriga u tahay si mashruuca loo hirgeliyo)

\_Inaad hayso saxeexa qofka mashruucaaga metelaya

\_Inaad foomkaaga dalbashada keento boosta taariikhda xidhitaanka kahor

Inta lagu jiro sannadka waxa jira taariikhaha xidhitaanka oo kala duwan oo aad dalban karto:

Mashaariicda bilaabmaysa inta u dhaxaysa	Taariikhda xidhitaanka dalbashada
1 May iyo 30 September	1 February
1 July iyo 30 November	1 April
1 September iyo 31 January	1 June
1 December iyo 30 April	1 September
1 February iyo 31 July	1 November



## Taageerada maaliyadda

Iyadoo ku xidhan nooca mashruuca aad qorshaynayso, ayaa waxaad heli kartaa deeq loogu talagalay.

\_Kharashyada socdaalka ee dadka ka qaybqaadanaya – kharashyada socdaalka, waa inay noqdaan habka dhaqaale ee ugu jaban iyo nooliyada.

\_Kharashyada Hoyga/Cuntada ee inta lagu jiro waxqabadyada (oo loo bixiyo sidii lacag go’an)

\_Kharashyada waxqabadka – Kharashyada sida tooska ah xidhiidhka ula leh mashruucaaga, oo ay ka mid yihiin caymiska (oo loo bixiyo sidii lacag go’an).

\_Qalabyada Tababarka – Fiiga tababareyaasha iyo qalabyada tababarka (oo loo bixiyo sidii lacag go’an)

\_Kharashka gaarka ah ee ka reebban – Kharash kasta oo si toos ah ula xidhiidha dhalinyarada fursadaha yar haysata/baahiyaha gaarka ah ama ay keentay nooca waxqabadku.

\_Kharashyada la xidhiidha Booqashada Hore Loo Sii Qorsheeyey – Kharashyada socdaalka, kharashyada hoyga iyo kharashyada kale ee inta booqashada lagu jiro.

\_Kharashyada faafinta iyo isticmaalidda natiijooyinka mashruuca ee dheeraadka ah

\_Kharashyada la xidhiidha ka qaybgelinta tababare Mashruuca Dhalinyarada



## Ka taxadir xaaladaha qaar kamid ah:

\_Dhammaan waraaqaha aad u soo dirto Hay'adda Qaranka ee Barnaamijka "Dhalinyarada Waxqabanaysa" markaad dalbanaysa maalgelinta mashruuca waxa loo arkaa waraaqo sharci ah oo shaqaynaya. Tan macnaheedu waxa weeye inay kaa go'antahay inaad samayso waxa lagu sheegay foomka dalbashada, heshiiska iyo warbixinta ugu dambaysa. Saxeexitaanka waraaqahani waxay kaa dhigayaan inaad masuul ka tahay waxa gudahooda ku qoran!

\_Wada Maalgelin – lacagta aad ka hesho Barnaamijka "Dhalinyarada Waxqabanaysa" ma wada dabooli doonto dhammaan kharashka mashruuca oo dhan. Inta ka dhiman waa inaad taageero maaliyadeed ka raadsataa ururada kale, hay'adaha ama aad qabanaabisaa lacag ururin.

\_Lama Ogola Laba Maalgelinood – haddii ay taageero maaliyadeed ku siiso Barnaamijka "Dhalinyarada Waxqabanaysa" maalgelin kale kama heli kartid Beesha Yurub isla mashruucaas.

Taariikhaha Mashruuca waa taariikhaha marka uu mashruucu bilowdo iyo Taariikhaha Mashruuca waa taariikhaha marka uu mashruucu bilowdo iyo marka uu dhammaado. Muddada u dhaxaysa labadan taariikhhood waa muddada xaq u yeelashada; tan macnaheedu waxa weeye in kharashyada mashruuca la xidhiidha oo keliya ama kugu yimaada muddadan ay dabooli karto maalgelinta Barnaamijka "Dhalinyarada Waxqabanaysa". Tigidhada ama wixii kasta ee kale ee la xidhiidha mashruuca waa in la iibsadaa muddadan gudaheeda. Muddadan waxa ku jira diyaarinta mashruuca iyo weliba qiimaynta kama dambaysta ah.

Taariikhaha dhacdada ama waxqabadka waa taariikhaha ay waxqabadka ugu weyni dhaco (sida maalinta ugu horraysa iyo maalinta ugu dambaysa Isweydaarsiga Dhalinyarada iwm). Taariikhaha waxqabadku sidaa darteed waxay ku dhacaan taariikhaha mashruuca waana inaanay bilaabmin isku mar taariikhaha mashruuca sababta oo ah kharashyada aad gasho waxqabadka ama dhacdada ugu weyn kahor ama kadib (diyaarinta iyo heerka qiimaynta ugu dambaysa) ma dabooli doonto maalgelinta Barnaamijka "Dhalinyarada Waxqabanaysa" ka timaadaa.

Taariikhda Xidhitaanka  
Dalabaadyada

Muddada u  
dhaxaysa  
(ca. 3 bilood)

Hay'adda Qaranka  
Hubinaysa dalabka  
(aakhirkana ama ogo-  
laanaysa ama diidaysa)

Taariikhda Bilaabitaanka  
Mashruuca

Heerka Diyaaarinta

Heerka qiimaynta  
(oo ay ku jirto dabagalka  
suurtogalka ahi

Taariikhda  
bilaabmitaanka  
waxqabadka

Muddada xaq u  
yeelashada

Taariikhda  
dhammaadka  
waxqabadka

Taariikhda dhammaadka  
mashruuca

Datum završetka projekta

## MAARAYNTA MASHRUUCA

Kvaliteta partnerstva / aktivno sudjelovanje svih učesnika u projektu

Tayada shuraakada/ka qaybqaadashada firfircoon ee dhammaan qabanqaabiyeyaasha mashruuca iskaashiga iyo shuraakadu waa ereyo muhiim u ah dhammaan mashaariicdan. Qabanqaabiyeyaasha mashaariicdu waa dadka masuulka ka ah inay ballanqaadaan ka qayb qaadashada firfircoon ee dhammaan kuwa kula shaqaynaya, iyo in la gaadho ahdaafta guud.

Waa kuwan qaar kamid ah qodobada ay tahay inaad eegto si aad ugu shaqaysaan iskaashiga ugu wanaagsan:

- Heerka wada shaqaynta (sidee ayaad u wada shaqaysaan? Sidee ayuu u wanaagsanyahay joogtona u yahay xidhiidhkiina emailka iyo telifoonku?)

- Iskaashiga iyo ka go'naanta qabanqaabiye kasta ee mashruuca

- Hubaal ka dhig in

taariikhda qabanqaabiyeyaashu ay ku habboontahay ujeedooyinka mashruuca

- Qeexitaan cad oo la isku waafaqay oo ah doorarka iyo shaqooyinka qabanqaabiye kasta oo mashruuca ku lug leh

Iskaashiga wanaagsan ee ka dhexeeya dhammaan dadka wada shaqaynaya iyo kuwa ka qaybqaadanaya waa in la sii wadaa inta lagu jiro heerarka kala duwan ee mashruuca. Heerka diyaarinta & qorshaynta muhiim ayuu u yahay guulaysiga mashruuca. Inta heerkana lagu jiro qabanqaabiyeyaasha iyo dhalinyarada ka qaybqaadanaysaa waa inay:

- Isku waafaqaan mawduuca guud ee mashruuca

- Ka shaqeeyaan qaybinta shaqooyinka,

barnaamijka waxqabadyada, hababka shaqaynta, taariikhda dadka ka qaybqaadanaya, qabanqaabooyinka baraktikada ah (goobta, bedelada, hoy'yada, taageerada luqadda)

- Ka qaybgeli dadka ka qaybqaadanaya ee ugu badan ee caqligalka ah mashruuca heerkiisan diyaarinta ah

U diyaari dadka ka qaybqaadanaya kulano dhaqano badani isdhexgelayaan dhalinyarada ka kala socota dhaqano iyo meelo kala duwan

- Waxa

lagu talinayaa in kooxaha dirayaa ay Booqashada La Sii Qorsheeyey ee Hore ay ugu tagaan kooxda la shaqaynaysa ee martigelinaysa



Dhacdada ama waxqabadka dhabta ah waxaad u baahantahay barnaamij cad oo qeexan (goorma ayaad doonaysaa inaad qabato maxay? Sidee? Waa maxay ujeedada waxbarasho ee waxqabad kastaa?). waxqabadyada aad isticmaasho waa in lagu miisaamaa laguna xidhiidhiyaa ujeedooyinka mashruuca ee Barnaamijka “Dhalinyarada Waxqabanaysa”. Barnaamij waxqabad:

Ujeedada Guud/ Mawduuca	Waxqabadka (Maxaynu qaban doonaa?)	Habka (Sidee ayaynu u qaban doonaa?)	Barashada (Maxaynu u qabanaynaa?– Sidee ayuu waxqabadkani gacan uga geysanayaa ujeedooyinka isweydaarsiga?)
Subax:			
Gelinka			
Dambe:			

Inta lagu jiro qiimaynta ugu dambaysa adiga iyo kuwa kale ee kula shaqaynayaa waa inaad ku muujisaan mashruuca oo aad xaqiijisaan haddii ujeedooyinkii hore la gaadhay iyo haddii filitaanadii qabanqaabiyeyaasha iyo dadka ka qaybqaadanayey lala kulmay, iyo weliba idinkoo eegaya natiijooyinka ka soo baxa mashruuca.

Haseyeeshee, waa suurtoagal ama xitaa lagu taliyaa inaad ku darto kulano badan oo qiimayn ah mashruucaaga: kulanada qiimaynta ee kahor, kadib ama inta lagu jiro waxqabadka ama in ka badan haddii aad u malaynayso inay faa’iido u leedahay mashruuca.

Badbaadinta iyo amniga dadka ka qaybqaadanaya aad ayuu muhiim ugu yahay shaqada dhalinyarada. Sababta oo ah sharciiga iyo siyaasaduhu way kala duwanaan karaan dal illaa dal waana daruuri in arrimahan lala falanqeeyo kuwa kula shaqaynaya ee dalal kale ka socda. Laakiin waxa jirta shuruuc guud oo khuseeya dhammaan mashaaricda iyo dalalka. Waa inaad hubaal ka dhigtaa:

\_In tiro ku filan oo ah hogaamiyeyaal kooxeed/qabanqaabiyeyaal ay joogaan si ay dhalinyarada uga caawiyaan inay ku wadaagaan khibradooda waxbarasho deegaan la ilaaliyey oo ammaan ah.

\_Inaad haysato qabanqaabiyeyaal/hogaamiyeyaal lab iyo dheddigba leh, marka ay labada sinjiba ka qaybqaadanayaan mashruuca

\_Inaad yeelato nidaamada wixii degdeg ah (sida tafaasiisha xidhiidhka ee 24/7 ah ee dalka martigelinaya iyo ka kale iyo adeegyada degdegga, maalgelin degdeg ah, qorshe taageero, qabanqaabiyeyaal iyo hogaamiyeyaal leh tababarka gurmada degdegga ah iwm).

\_Inaad samaysato ‘xeerka hab dhaqanka’ oo ka caawin doona qabanqaabiyeyaasha iyo dadka ka qayb qaadanaya labadaba inay ixtiraamaan heerarka hab dhaqanka ee la isku waafaqay (sida isticmaalidda aalkolada iyo tubaakada iwm.).



## Tayada waxyaabaha uu mashruucaagu ka koobanyahay iyo habka loo samaynayo

Mawduuca ama ujeedada iyo weliba ujeedooyinka aad u doorato mashruucaaga waa inay noqdaan qaar xiiso leh oo khuseeya dhalinyarada ka qaybqaadanaysa mashruuca. Ujeedooyinka sida fiican u faahfaahsani waxay qeexaan waxa aydun koox ahaan doonaysaan inaad gaadhaan inta mashruucu socdo, sida “inaad barataan waxay yihiin mabaadii”da guud ee dhammaan dhaqamada Yurubiyanka” ama “inuu midkiinba ka kale baro hababka fudud ee dib u warshadaynta”. Ujeedooyinkaagu waxay ku xidhanyihiin mawduuca mashruucaaga iyo hababka shaqada. Maadaama ay mawduuca tallaabada xigta iyo ujeedooyinkaba tahay in loo turjumo barnaamij Waxqabad oo xooggan.

Si aad u samayso Waxqabadyada waa inaad ku dabaqdaa hababka iyo xeeladaha waxbarashada aan caadiga ahayn oo kala duwan (kulano, shaqo kooxeed, door ciyaarid, nashaadyada dibeda ah, isbarasho, miiska lasoo wada fadhiisto ee laysku xeero iwm). Si looga hadlo baahiyaha kala duwan ee dadka ka qaybqaadanaya iyo si loola kulmo natiijooyinka la doonayo. Aakhirka waa inuu noqdaa nidaam waxbarasho oo kiciya ama keena abuuritaan, ka qaybqaadasho firfircoon iyo bilaabitaan.

Waxaad qalabyo iyo waxyaabo kale ka heli kartaa

[www.salto-youth.net/toolbox/](http://www.salto-youth.net/toolbox/)


mid ka mid ah ujeedooyinkaaga dhammaan waxqabadyada mashruuca waa inuu noqdaa **in laga qaybgeliyo dadka ka qaybqaadanaya** ee ugu badan ee suurtogalka ah iyo in la bilaabo nidaamka waxbarasho. Dhalinyaradu waa inay awoodi karaan inay si isle’eg u baadhi karaan mawduucyo kala duwan, iyadoon loo eegin awoodahooda luqadeed ama xirfadaha kale.

Mashruucaagu waa inuu ka caawiyaa dadka ka qaybqaadanaya inay yeeshaan **isku kalsooni** markay la kulmaan khibrado cusub, dabecado, dhaqano isla markaana ay gacan ka geystaan horumarkooda bulsho iyo shakhsi.

Waa inaad ka shaqaysaa inaad siyaadiso ka warqabka dhalinyarada ee **isdhexgalka dhaqamada**. Waana inuu ka caawiyaa in laga hortago waxna laga qabto waxyaabaha khaladka ah ee la iska aaminsanyahay, cunsuriyadda iyo dhammaan dabecadaha keenaya takooridda iyo inuu sameeyo dareen ah isu adkaysi iyo isfahamka kala duwanaanshaha.

### Saamaynta, faafinta saamaynta iyo dabagalka

Intaad mashruucaaga wadid waa inaad isku deyin oo keliya inaad ka qaybgelisid dhalinyarada go’aan qaadashada ku saabsan mashruuca laakiin waa inaad kaloo isku daydaa inaad dadka jaarka ah, ku nool aagga maxaliga ah ka qaybgelisid waxqabadyada mashruuca. Qabanqaabiyeyaasha iyo dadka ka qaybqaadanayaa waa inay iyana isku dayaan inay faafiyaan ujeedooyinka mashruuca iyo natiijooyinka iyagoo la shaqaynaya kuwa fidiya ama ay xitaa iyaga laftoodu isticmaalaan natiijooyinka kana fekeraan suurtogalnimada mashruuc dabagal ah oo qaar intan ka badani la shaqaynayaan. Haddii sidaas la sameeyo mashruucu waa inuu gaadhaa saamaynta muddo dheer ah.



## SHAHAADADA 'YOUTH PASS'

Qof kasta oo ka qaybqaatay 'Dhalinyarada Waxqabanaysa' Isweydaarsiga Dhalinyarada, Adeegga Mutadawucnimada ee Yurubiyanka ama Mashruuca Koorsooyinka Tababarka waxa la siin doonaa shahaadada Youthpass. Haddii aad shahaadadan hay-sato waxa lagu aqoonsaday sidii qof ka qaybqaatay khibrad waxbarasho iyo muddo waxbarasho aan rasmi iyo caadi ahayn. Taasina waxay faa'iido weyn u noqon kartaa mustaqbalkaaga waxbarasho ama shaqo. Waxaad ka geli kartaa Youthpass websaytka:

[www.youthpass.eu](http://www.youthpass.eu)

Shuruudaha faahfaahsan ee sida dalabaadka loo soo gudbiyo waxa lagu sharxay hagitaanka Barnaamijka "Dhalinyarada Waxqabanaysa" ee ku jira:

[www.ec.europa.eu/youth/youth-in-action-programme/doc443\\_en.htm](http://www.ec.europa.eu/youth/youth-in-action-programme/doc443_en.htm)

Wixii ah macluumaad dheeraad ah iyo taageero kala xidhiidh Hay'addaada Qaranka ee Barnaamijka "Dhalinyarada Waxqabanaysa".

[www.ec.europa.eu/youth/youth/contacts\\_en.htm?cs\\_mid=152](http://www.ec.europa.eu/youth/youth/contacts_en.htm?cs_mid=152)

## EREY BIXIN

**Waxqabad:** qaybta mashruuca ee wax isweydaarsiga, ee ay tahay in la qabanqaabiyiyo si natiijooyin loo gaadho

**Booqashada Sii Qorshaynta Hore:** Waa booqasho lagu tago Ururka Martigelinaya inta lagu jiro qorshaynta ama heerka hore ee diyaarinta mashruuca, kahor intaanu mashruucu bilaabmin

**Foomka Dalbashada:** haddii aad doonayso inaad ka dalbato Barnaamijka Dhalinyarada Waxqabanaysa, waa inaad buuxisaa isla markaana aad gudbisaa foom dalbasho oo ofishal ah. Waxaad ka soo guurin kartaa websaytka Golaha ee ah: [www.ec.europa.eu/youth/youth-in-action-programme/doc411\\_en.htm](http://www.ec.europa.eu/youth/youth-in-action-programme/doc411_en.htm)

**Qofka dalbanaya:** waa qofka soo gudbiya mashruucu si uu maalgelin uga helo Barnaamijka Dhalinyarada Waxqabanaysa.

**Ka faa'iide:** haddii mashruucaaga la doorto, waxaad noqonaysaa qofka ka faa'iidaya Barnaamijka Dhalinyarada Waxqabanaysa, taas oo uu macnaheedu yahay inaad ka faa'iidi doontid ama aad u heli doontid lacago mashruucaaga. Waxaad saxeexaysaa heshiiska maalgelinta, maalgelin maaliyadeed ayaad u haysaa mashruucaaga waxaanaad ku dhaqaaqaysaa masuuliyadaha ah hirgelintiisa.

**Tababare:** waa qof khibrad u leh shaqada dhalinyarada iyo weliba qabanqaabinta mashaaricda sida Barnaamijyada Dhalinyarada ee kooxdaada siiya taageero si dhacdadu si guul ah ugu dhacdo

**Ururka Xidhiidhinaya:** waa qabanqaabiyaha masuulka ka ah qaybaha maamulka iyo maaliyadda ee mashruuca, ee xidhiidhinaya mashruuca isagoo iskaashi la samaynaya kuwa la shaqaynaya isla markaana u qaybinaya deeqda ama maalgelinta Midowga Yurub qabanqaabiyeyaasha kale siday yihiin doorarkooda isla mashruuca gudhiisa.

**Shuruudaha xaq u yeelashada:** Kuwani waa shuruudaha ay tahay inuu mashruucaagu buuxiyo, ee gaar ahaan khuseeya kooxda uu abbaarayo, goobtiisa, inta uu soconayo iyo waxyaabaha uu ka koobanyahay.

**Fududeeye:** Waa qofka sida ugu badan ee caqligalka ah dhexdhexaad u ahaada inta uu mashruucu socdo kooxdana ka dhiga mid diiradda saaraysa shaqooyinka, ka qaybgeliya kuna dhiiriya qof kasta oo kooxda ka mid ah. In la dhegeysto waxay dadku sheegayaan waa xirfad daruuri ama muhiim u ah shaqadan.

**Warbixinta kama dambaysta ah:** laba bilood gudahood markuu mashruucaagu dhammaanayo, waa inaad dhamaystirtaa oo aad saxeexdaa warbixin una dirtaa Hay'adda Qaranka. Waa inaad sharaxdaa sida mashruuca loo hirgeliyey, oo aad sheegtaa waxay maaliyaddii ku baxday (kharashka la galay iyo dakhliga)

**Dabagalka:** mashaariic/waxqabadyo la sameeyo marka mashruucu dhammaado kadib si natiijooyinka mashruuca looga dhigo qaar nool oo la sii wadi karo iyo in la siyaadiyo saamayntiisa.

**Waxqabadka wanaagsan:** mashruuca ugu wanaagsan ee lagu dayan karo ee sida fiican u saameeyey intay socdeen hababkiisa waxqabad iyo natiijooyinkiisu. Hadhow qabanqaabiyeyaashu waa inay isku weydaarsadaan, faa'iyaan, u isticmaalaan waxqabadka wanaagsan deegaano iyo meelo kala duwan. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa [www.salto-youth.net](http://www.salto-youth.net)

**Heshiiska Maalgelinta:** kani waa faahfaahinta, shuruudaha iyo heerka maalgelinta ee maamuli doona siday maalgelinta Midowga Yurub loo isticmaalay.

**Hogaamiyaha Kooxda:** qof weyn (barnaamijkan waa qof 25 jir ka weyn ) oo dhalinyarada waxqabadka ka qaybqaadanaysa la socda si hubaal looga dhigo si fiican wax u barashadooda, badbaadadooda iyo amnigooda

**Ururka Martigelinaya (HO):** qabanqaabiyeyaasha jooga dalka uu mashruuca waxqabadku ka dhici doono.

**Koox dhalinyaro ah oo aan urur ka socon:** koox dhalinyaro ah oo is urursaday iyadoo aanay taageerayn urur caadi ah/sharci/diiwaangashani ama qaab.

**Si sharci ah u deggan:** qof ay aqoonsanyihiin shuruucda qaranka ee dalkoodu oo haysta waraaqaha deganaanshaha ee sharciga ah.

**Hababka:** habab waxbarasho oo aan caadi ahayn oo kala duwan oo nidaamo ah iyo farsamooyin oo lagu dabiqi karo si wax looga qabto baahiyaha kala duwan ee dadka ka qayb qaadanaya iyo natiijooyinka la doonayo.

**Faafiye:** qof mashruuca ku lug leh oo faafiya macluumaadka ama fariinta oo ku faafiya dad badan/beel, si loo siyaadiyo saamaynta mashruuca (sida dhalinyarada, shaqaalaha dhalinyarada, laakiin iyana warbaahinta, hogaamiyeyaasha siyaasada iyo go'aan qaadheyaasha Midowga Yurub)

**Hay'adaha Qaranka (NAs):** Dal Barnaamijeed kasta ee Barnaamijka "Dhalinyarada Waxqabanaysa" wuxuu leeyahay Hay'ad Qaran. Tafaasiisha xidhiidhka ee dalkaaga waxaad ka heli kartaa halkaan: [www.ec.europa.eu/youth/youth/contacts\\_en.htm?cs\\_mid=152](http://www.ec.europa.eu/youth/youth/contacts_en.htm?cs_mid=152)

**Dalalka Shuraakada ee Jaarka:** dalalka aan ahayn Dalalka Barnaamijka laakiin uu Barnaamijka "Dhalinyarada Waxqabanaysa" taageero iskaashigooda ka dhexeeya Dalalka Barnaamijka iyo Dalalka Lammaanaha ku ah ee Jaarka ee soo socda:

Albania	Armeniya	Aljeeriya
Bosnia iyo Herzegovina	Azerbaijan	Masar
Koroweshiya	Belarus	Israel
Maasadooniya (FYROM)	Joorjiya	Urdu
Montenegro	Moldova	Lubnaan
Serbiya	Midowga Raashiya	Marooko
	Yukreyn	Hay'adda Falastiin ee Gacanka Galbeed iyo Marinka Qasa
		Suuriya
		Tuuniisiya

**Lammaane:** koox kale oo uga qaybqaadanaysa mashruuca shuraako ahaan.

**Shuraako:** xidhiidh ka dhexeeya qabanqaabiyeyaal kala duwan oo ku lug leh qabashada mashruuca. Iskaashigan dhowi wuxuu muujinayaa masuuliyado maaliyadeed iyo shaqo oo ay leeyihiin dhammaan lammaaneyaashu: qeexitaanka doorarka, dib u qaybinta shaqoyinka iyo waxqabadayada.

**Muddada Mashruuca:** dhammaan muddada laba bilaabo bilaabitaanka illaa iyo dhammaadka mashruuca, oo ay ku jiraan heerka diyaarinta, hirgelinta waxqabadka iyo heerka qiimaynta (oo uu ku jiro muujinta dabagalka suurtoogalka ah).

**Dalalka Barnaamijka:** ka qaybqaateyaasha iyo qabanqaabiyeyaasha ka socda Dalalka Barnaamijka way ka qaybqaadan karaan dhammaan Waxqabadayada Barnaamijka "Dhalinyarada Waxqabanaysa". Kuwa soo socdaa waa dalalka Barnaamijka:

Austeria	Jarmalka	Holand	Ayslaand
Beljim	Giriiga	Boland	Liechtenstein
Bulgaariya	Hungery	Boortaqiiska	Noorway
Qubrus	Ayrilaand	Roomania	Turkiga
Jamhuuriyadda Jeega	Itaaliya	Jamhuuriyadda Slovak	
Dheenmaark	Litwaynia	Slovenia	
Estooniya	Luksamberg	Isbeyn	
Finland	Maalta	Iswidhan	
Faransiiska		Ingiriiska	

**Qabanqaabiye:** urur kasta, hay'ad ama koox dhalinyaro ah oo ku lug leh hirgelinta mashruuca "Dhalinyarada Waxqabanaysa". Oo ku xidhan doorka ay ku leeyihiin mashruuca, qabanqaabiyuhu wuxuu noqon karaa lammaane, qof dalbanaya iyo ka faa'iide.

**Ururka Diraya (SO):** qabanqaabiyaha diraya (koox ah) dadka ka qaybqaadanaya isagoo ka caawinaya inay waxqabad ama dhacdo dalka dibediisa ah ka qayb qaataan.

# Isticmaal Barnaamijka “Dhalinyarada Waxqabanaysa”!

**SOMALI** version

**SALTO-YOUTH**  
CULTURAL DIVERSITY  
RESOURCE CENTRE



SALTO-Youth is a network of 8 Resource Centres across Europe that provides information, training and support for international youth projects in the framework of the European Commission's "Youth in Action" Programme. We respond to the needs of the National Agencies of this Programme to support Inclusion and Cultural Diversity on an international level and with local impact. Our activities take place in non-formal environments (outside of schools and universities) in order to provide youth leaders with specific skills and competencies that they can then utilise and multiply in their own communities. Our core aim is to encourage the quality and quantity of youth projects across Europe. You can find more information about us at: [www.salto-youth.net](http://www.salto-youth.net)